



## Maalinta Macallinka

### ***Dhambaalka Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare e ku Aaddan Munaasabadda Maalinta Macallinka Soomaaliyeed:***

Aqoonta, fekerka, dhaqanka iyo xikmaddu waa waxa aadanaha uga soocan yahay uunka intiisa kale. In waxsoosaarka feker iyo aqooneed ee noqday cilmi iyo dhaqan saldhigtay, la isdhaxalsiiyo, oo jiiilba jiiil garddaadiyo waa waxa horumarka, wanaagga iyo ilbaxnimada ummadaha u horseedo. Haddaba, macallinku waa aabbaha iyo hooyada horseedka iyo hoggaamiyaha ka ah barbaarinta, hiliin-toosan ku-hagidda iyo aqoon dhaxalsiinta ubadkeenna.

Sida ay ummad walba u qiimeeyso martabadda iyo makaanada uu macallinku ku dhex leeyahay bulshada, ayaa tusaale u ah sida ay dhab uga tahay jiritaanka iyo mustaqbalka dadkeeda.

Taariikhda uu macallinka Soomaaliyeed soo maray iyo duruufaha uu maanta waajahayo si weyn ayaan uga wada dheregsanahay. Waxa aan ognahay in macallimiinta Soomaaliyeed rag iyo haweenba ay ku soo shaqaynayaan duruufihii qalafsanada ee dhaqan-dhaqaale ee dalka ka jiray, iyada oo ay taa jirtana, aysan waxba ka hagraniin sidii ay xirfad, aqoon iyo jiheeyn u siin lahaayeen ardayda Soomaaliyeed. Inta ay Soomaalida maanta ku dhaqdhaqaaqeyso, iyo iftiinka u bidhaamaya, waxaa lafdhabar iyo horseed u ah halganka iyo is-xilqaanka macallinka Soomaaliyeed.

Iyada oo si weyn u aqoonsan dawladda muhiimka ah ee macallinku leeyahay, ayaa Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare waxaa ka go'an in ay had iyo goor taageerto horumarinta xirfadeed iyo tan aqooneed ee lagu tayaynayo macallimiinta. Waxa ay macallimiintu heli doonnaan tababarro joogto oo sare loogu qaadayo mihiiddooda macallinimo, si ay awoodaan in ay tacliin tayo leh u siiyaan ubadka Soomaaliyeed.

Wasaaraddu waxa ay iska xilsaari doontaa sidii uu macallinka Soomaaliyeed u heli agabka, kaabayaasha iyo daryeelka uu mudan yahay.

Waxa guul la taaban kara ah in sannadkan 3,000 oo macallimiin ah la qaatay, la tababaray, ayna ka hawlgaleen dugsiyo ku yaalla deegaanada Maamul Goboleedyada iyo Gobolka Banaadirba. Miisaaniyadda dhowaan ay Golaha Wasiiradu meelmariyeen waxa qeyb ka ah in 3,000 oo macallimiin hor leh ah la qaato, lana hawlgeliyo sannad miisaaniyadeedka nagu soo fool leh. Waa talaabo ay dawladdu u qaadday si loo baahiyo waxbarashada, looguna gurmado ubadka Soomaaliyeed ee waxbarasha la'aanta haysato. Waxa ugu muhiimsan ee baahidaa dabooli karana waa in la helo macallin tababaran.

In la helo macallin xirfad iyo aqoon tayaysan leh waxaa ay daruuri u tahay dib-u-dhiska tarbiyadda, wacyiga, aqoonta iyo mideeynta dareenka iyo isudanaqashada ardayda iyo guud ahaan muwaadiniinta Soomaaliyeed. Aqoon iyo barbaarin ujeedo qaran leh, oo ku qotonka dhaqanka suuban ee diinteenna Islaamka, ayaa difaac iyo xeyndaab adag u ah xagjirnimada, bahalnimada iyo afkaaraha dadqalato ee argagaxisada Khawaarijta iyo dhaqan kasta oo liita. Waxa aan hiigsanaynaa sidii loo heli lahaa waxbarasho daryeesha dhallaanka, kobcisa garashadooda, xorriyad ay waaqacooda ugu fekeraanna siisa. Hiigsigaa iyo hiraalka wanaagsan waxaa suurtagelin kara macallin tayaysan oo agabkiisii loo dhameeystiray.

Hambalyo ayaan leeyahay dhammaan macallimiinta Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan. Guul iyo Horumar wacan.

***Mudane Faarax Sheekh Cabdulqaadir,***

Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare